Horn Institute for Peace and Development

Xakamaynta Safmarka COVID-19: Kaalinta Dowladda iyo Bulshada

Qormo Kooban

Maajo 2020

Hordhac

Safmarka CoronaVirus (COVID-19) waa mid ka mid ah cudurada faafa, kaas oo ku dhaca neef-mareenka. Bishii Disembar ee sanadkii tegay ayuu ka billowday dalka Shiinaha, gaar ahaan magaalada Wuhan, ka dibna waxa uu ku sii faafay dunida oo idil. Tan iyo markii uu soo ifbaxay cudurka, waxaa la soo weriyey in uu ku dhacay in ka badan saddex milyan iyo bar oo qof, wuxuuna sababay dhimasho gaaraysa in ka badan laba boqol iyo afartan kun. Dadka ka bogsaday xanuunka waxaa lagu qiyaasaa in ka badan hal milyan.[1] Bukaanada uu cudurkani ku dhacay ilaa iyo hadda waa 98% meel dhexaad ah halka 2% uu ka yahay mid dilaa ah. Calaamadaha lagu garto Covid-19 waxaa ka mid ah qandho, qufac, daal, neefqabasho iyo urka iyo dhedhenka oo la waayo. Xilli huuriskiisa (incubation period) waxaa lagu tilmaamaa inta u dhexeysa 2-14 maalmood. Inta badan waxa uu ku faafaa qufaca, hindhisada ama in aad toos ugu dhawaato qofka qaba xanuunka, gacanqaaddo ama taabato meelaha uu taabtay.

16 kii bisha Maarso 2020, Dowladda Federaalka Soomaaliya ayaa markii ugu horreysay xaqiijisay in cudurkaas safmarka ah uu dalka soo gaaray, lagana helay qof ka yimid dibadda. Intaas wixii ka dambeeyey, xukuumaddu waxay qaadday dhowr tallaabo oo ay ku xakamaynayso cudurka. Waxaa la xiray goobihii waxbarashada sida Iskuulada iyo Jaamacadaha, duulimaadyada gudaha iyo dibadda ayaa la hakiyay, goobaha ay dadku iskugu yimaadaan waa la yareeyey, bandow ka billaabanaya habeenkii 08:00 fiidnimo kuna eg 05:00 aroornimo ayaa la soo rogay, waxaana la dhisay guddi qaran oo u xilsaaran ka hortagga faafidda cudurka.[2]

Si kastaba ha ahaatee, iyada oo ay jirto tallaabooyinkaas la qaaday, haddana Soomaaliya kuma aysan guuleysan in ay ka hortagto in cudurku uu si ba'an ugu dhex faafo bulshada. Bishii Abriil ayay Wasaaradda Caafimaadka ee DFS shaacisay in markii ugu horreysay Covid-19 laga helay qof aan dalka dibaddiisa safar uga imaan. Arrintaas waxaa loo sababeyn karaa saddexdan sababood: Tan koowaad, in dowladda ay yaraysatay heerka baahidda cudurka ee bulshada dhexdeeda, iyada oo la ogyahay sida aysan bulshadu ugu dhaga-nugleyn farriimaha caafimaad ee ka imaanaya hay'adaha dowladda. Sidoo kale, markeedii horana aysan xoogga saarin in laga hortaggo in cudurka uu gaaro heer uu u gudbo bulshada. Midda labaad, in cudurku uu mar hore u sii gudbay bulshada balse dowladdu ay warmoog ka aheyd. Midda saddexaad, shaki bulshadu ka qabto baaxadda waxyeellada cudurka iyo wararka ku-tiri-ku-teenka ah ee xaqiiqda ka fog oo ay isla dhex-maraysay. Si kale u dhig, wararka ku saabsan in cudurku uusan saamayn ku yeelan doonin iyaga sababo la xiriira in cudurkani uusan ku dhicin dadka Muslimiinta ah iyo cimilada ay ku nool yihiin oo ah mid aan u suuragalineyn in uu si sahlan ugu faafo.

08 Abriil, 2020 Dowladda Federaalka Soomaaliya waxay sheegtay in ay diiwaangelisay qofkii ugu horreeyey ee u dhintay cudurka Covid-19, wuxuu ahaa qof aan dalka dibaddiisa safar uga imaanin. Tan iyo markaas wixii ka dambeeyey, cudurku wuxuu sababay dhimasho badan. Bishan Maajo, 03

[1] Worldometers, 2020

[2] For more information see for example https://hipad.net/2020/04/25/somalia-and-the-covid-19-pandemic-the-socio-economic-impact-and-the-policy-responses/

2020, Wasaaradda Caafimaadka ee DFS waxa ay soo saartay macluumaadkii ugu dambeeyey ee ku aaddan tirada dhimashada, waxa ayna diiwaangelisay dhimashada 31 qof,[3] balse dadka khubarada ah ee ku xeeldheer cudurkan iyo saameyntiisa waxa ay ku doodayaan in tirada dhimashada ay intaas ka badan tahay. Sababtuna waxa ay tahay in dowladda aysan u diiwaangashneyn dhammaan dadka uu soo ridanayo cudurka iyo kuwa u geeriyoonayaba.

Qormadan kooban waxa ay eegaysaa kaalinta dowladda iyo bulshada ee ku aaddan xakamaynta cudurka COVID-19. Waxaa kaloo ay soo gudbinaysaa talooyin wax ku ool ah, kuwaas oo ku socda dowladda iyo bulshada qaybaheeda kala duwan.

Kaalinta Dowladda Ee Ku Aaddan Xakamaynta COVID-19

Waxaa jira laba caqabadood oo hortaagan xakamaynta COVID-19, kuwaas oo mudan in la tixgeliyo. Midda koowaad, waa colaaddii dheereyd ee Soomaaliya ka jirtay oo meesha ka saartay isbitaaladii dadweynaha, hay'adahii qaabilsanaa caafimaadka iyo daryeelka bulshada. Tani waxa ay sababtay in fayodhowrka bulshada uu noqdo mid ku tiirsan hay'adaha samafalka ee caalamiga ah ee bixiya gargaarka bini'aadannimo. Midda labaad, waa dowladda Soomaaliya oo aan lahayn awood dhaqaale, mid farsamo, qalab, aqoon iyo dhaqaatiir caafimaad oo ku filan si ay u xakamayso faafitaanka cudurka.

Iyada oo ay jiraan caqabadahaas, haddana Dowladda Federaalka Soomaaliya waxa ay qaadday tallaabooyin wax ku ool ah ka hor intii aysan soo if-bixin in cudurku uu u gudbay bulshada. Tallaabooyinkaas waxaa ka mid ah dhismaha guddi qaran oo ka kooban dhowr wasaaradood, Gobolka Banadir, Xafiiska Ra'iisulwasaaraha, Ururka dhaqaatiirta, Culummada Soomaaliyeed, ganacsatada iyo bulshada rayidka. Guddigan waxaa hormuud ka ahaa wasaaradda caafimaadka, iyada oo islamarkiiba ku dhaqaaqday tallaabooyin ka hortag, sida baaritaan horudhac ah oo lagu sameeyey cid kasta oo dalka soo galaysa, dhismaha goobo lagu karantiilo dadka looga shakiyo in ay qabaan xanuunka.

Waxa ay aheyd in Dowladda Federaalka Soomaaliya ay awooddeeda oo idil isugu geyso sidii cudurkan safmarka ah uusan u soo gali lahayn dalka, balse mar haddii cudurku uu gudaha dalka soo gaaray, waxaa halkaas ka cad in dowladda ay culeys badan kala kulmi doonto xakamayntiisa. Sidoo kale, marka la eego sida cudurku ugu dhex faafay dadka deggan magaalada Muqdisho, waxaa muuqata in dowladda ay ku adkaan doonto xakamaynta faafitaanka cudurka iyo waxyeelladiisa. Waxaa kaloo muuqaata in cudurku uu u sii gudbi doono gobolada dalka, iyada oo xilli roobaadkii lagu jiro, duruufaha nololeed ee deegaannada intooda badanna ay adag yihiin, adeeg iyo agab caafimaadna aanu markii horaba ka jirin. Sidaas darteed, waxaa lama huraan ah in Dowladda Federaalka, Dowlad-Gobolleedyada, bulshada Soomaaliyeed qaybaheeda kala duwan iyo beesha caalamka ay iska-kaashadaan sidii looga hortagi lahaa in cudurku uu si xad-dhaaf ah ugu faafo gobolada dalka. Marka laga soo tago in iskaashigani badbaado u yahay bulshada Soomaaliyeed, wuxuu kaloo ku dhiirigelinayaa beesha caalamka in ay ku dadaasho sidii ay u sii wadi lahayd kaalmada ay siiso dalka Soomaaliya iyada oo aysan caqabad kala kulmeynin kala qaybsanaanta siyaasadeed ee u dhexeysa Dowladda Federaalka iyo Dowlad-Gobolleedyada.

[3] http://moh.gov.so/en/newsPage.php?Id=82

Isbitaalka Martiini waa goobta keliya ee xilligan lagu hayo dadka laga helo cudurka Covid-19. Balse sida muuqata dowladda waxaa u qorsheysan in qayb ka mid ah isbitaalka Banaadir (Martiini 2) laga dhigo goobta labaad ee dadka xanuunka qabo lagu hayo. Martiini qaybtiisa ICU-da waxaa taalla 25 sariirood oo keliya, guud ahaan bukaanada uu isbitaalku qaadi karana waa 67 bukaan, taas oo muujinaysa faraqa weyn ee u dhexeeya baaxadda xanuunka iyo tiro yarida agabka u diyaarsan dowladda. Waxaa kaloo jirta in Dowladda Federaalka Soomaaliya ay ku yar yihiin qalab caafimaad oo tayo leh, dhaqaatiir, farsamada iyo aqoonta lagu xakameeyo cudurka. Sidoo kale, awood uma lahan in ay wada baarto dhammaan bulshada (mass testing). Sababtuna waxa ay tahay in dalka uusan oolin wax ka badan saddex sheybaar: Mid wuxuu yaala Muqdisho, midna Hargeysa, kan kalena Garowe.[4] Intaas waxaa sii dheer, dadka uu soo rito cudurkan looma hayo goobo ku filan oo adeeg caafimaad loogu fidiyo.

Kaalinta Bulshada Ee Ku Aaddan Xakamaynta COVID-19

Cudurka COVID-19 wuxuu si guud u saameeyey caafimaadka iyo fayodhowrka bulshada, si gaar ahaaneed dadka waayeelka iyo kuwii horay u xanuunsanaa, bulshada qaybteeda dan yarta ah ee ku nool xerooyinka barakacayaasha (IDPs), ardayda laga xiray iskuulada iyo Jaamacadaha, macallimiinta oo qaarkood shaqo la'aan ku dhacday iyo boqolaal dhallinyaro ah oo habeenkii ku shaqeysta gaadiidka bajaajka. Waxaa sii dheer, in la filayo in COVID-19 uu si gaar ah saameyn weyn ugu yeelan doono caafimaadka dadka ku nool xerooyinka (IDPs) ee magaalooyinka waaweyn, maadaama aysan awoodin helitaanka biyo nadiif ah, agabka nadaafadda sida saabuunta, daawada gacmaha lagu dhaqdo, marada afka lagu xirto iwm.

Marka ay timaaddo xakamaynta safmarka Covid-19, bulshadu waxa ay ka ciyaari kartaa kaalin muhiim ah sida in ay isu abaabusho sidii ay isku caawin lahayd, si wadajir ahna ay uga hortagi lahayd in cudurku uu ku sii faafo gobollada dalka iyaga oo kaashanaya hay'adaha Dowladda Federaalka iyo kuwa Dowlad Gobolleedyada. Dhanka kale, sanad kasta waxaa malaayiin doollar ku bixi jirtay xajka, haddaba, maadaama sanadkan aysan suuragal ahayn in la soo xajiyo, bulshadu waxay kaalin ka qaadan kartaa in lacagahaas faraha badan lagu caawiyo dadka caafimaad ahaan iyo dhaqaale ahaan uu cudurku saameeyey.

Dadka khubarada ah ee cudurkan la tacaala, kana hawlgala isbitaalka Martiini waxyaabaha ay soo arkeen waxaa ka mid ah in dadka qaar uusan ku dhacaynin si kasta oo ay ula nool yihiin bukaanada qaba cudurka, qaar kalana ay cudurka qabaan oo haddii la baaro laga helayo iyada oo aysan ka muuqanin calaamadihii cudurka islamarkaana aan dareemeynin wax xanuun ah, qiyaasta tirada dadkaas waxaa lagu sheegaa 70%. Haddii ay xogtani sidan u jirto waxaa muuqanaysa in qaab-dhismeedka bulshada Soomaaliyeed ee xagga da'da ay saamayn ku leedahay arrinkan sababtuna waa in boqolkiiba 75% bulshada Soomaaliyeed da'doodu ka yar tahay 35 sano.[5] Halka qaar kalana ay u geeriyoonayaan oo si-kasta oo loola tacaalo aan waxba laga qaban karin, taas oo ay Soomaaliya kala mid tahay adduunyada inteeda kale.

[4] https://www.hiiraan.com/news4/2020/Apr/177962/somalia_struggles_with_coronavirus_as_infections_go_undetected.aspx?utm_source=hiiraan&utm_medium=SomaliNewsUpdateFront

[5] https://somalia.unfpa.org/en/news/youth-somalia-plan-better-future

Guudahaan, waxaad muuuqata in kaalintii bulshada ay gaabis tahay, waxaana loo sababeynayaa saddexdan arrimood. Midda koowaad, in ay tahay cabsi ay dadku ka qabaan cudurka iyo waxyeelladiisa. Midda labaad, in ay tahay kalsooni-darro ay ku qabaan dedaallada dowladda ee ku aaddan la dagaalanka Covid-19, qaar badan oo bulshada ka mid ahna waxa ay rumaysan yihiin in dowladda aysan daacad ka ahayn xakamaynta cudurka. Arrinkaasi wuxuu keenay in bukaano badan aynan tegin goobihii loo asteeyay in adeeg caafimaad loogu sameeyo iyaga oo taas ka doorbiday in ay qoyayskooda la joogaan, in badan oo bukaannadaas ka mid ahna guryahooda ayay ku geeriyoodaan, lagumana daro liiska tirada dhimashada ee maalinlaha ee ay soo tebiso wasaaradda caafimaadka.

Sida horay loo soo arkay, bulshadu kaalinta ugu weyn ayay ka qaadataa marka musiibooyinka noocan oo kale ah dhacaan. Tusaale, xanuunkii Ebola markii dalalka Galbeedka Afrika uu ka dillaacay sanadkii 2014, waxaa looga adkaaday abaabul bulsho oo xoog leh, iyo wadashaqeynta dawladda iyo bulshada. Si lamid ah, taakulaynta dadkii ku waxyeelloobay abaarihii iyo fatahaaddii webiyada ee deegaano badan oo dalka halakeeyay sannidihii la soo dhaafay waxaa kaalinta ugu weyn ka qaatay qaybaha kala duwan ee bulshada Soomaaliyeed, oo gurmad baaxad leh ka samaysay dalka iyo dibaddaba.

Talooyin

Si loo xakameeyo faafidda safmarka Covid-19, loona yareeyo khasaarihiisa, Machadka Nabadda iyo Horumarinta (HIPAD) waxa uu talooyinkan hoos ku xusan u soojeedinayaa Dawladda Federaalka, Dowlad-Gobolleedyada iyo dhammaan qaybaha kala duwan ee bulshada:

1. In Isbitaallada gaarka loo leeyahay loo sameeyo qaybo lagu baaro bukaannada looga shakiyo cudurka Covid-19 si isbitaalka Martiini looga fududeeyo culeyska saaran.

2. In Dawladdu ay howlgeliso isbitaalka Erdogan (Ex Digfeer) iyo Shiikh Zaayid si ay qayb uga noqdaan dadaallada xakamaynta iyo daaweynta bukaanada qaba xanuunka.

3. In la sameeyo wacyigelin xooggan oo joogta ah, waddooyinkana lagu dhejiyo tilmaamo muujinaya halista cudurka Covid-19, warbaahinta qaranka iyo kuwa gaarka loo leeyahayna laga sii daayo barnaamijyo wacyigelineed oo ku aaddan halistiisa. Sidoo kale, culimada Soomaaliyeed iyo indheergaradka waa in ay kaalin weyn ka qaataan isku-xirka bulshada iyo dowladda, iyo taakulaynta hay'adaha caafimaadka iyo dadka ay wax ka soo gaareen saameynta dhaqaale ee cudurku ku yeeshay dalka.

4. In madaxda Dawladda Federaalka, kuwa Dowlad-Gobolleedyada iyo madaxda xisbiyada ay meel iska dhigaan wixii kala duwanaansho siyaasadeed ah, una guntadaan sidii ay uga wadashaqayn lahaayeen xakamaynta cudurkan halista ku ah jiritaanka ummadda. Sidoo kale, in ay si wadajir ah ugu dhiirigeliyaan bulshada in kaalin mug leh ka qaadato dedaalada loogu jiro xakamaynta Covid-19.

5. In dowladda ay shacabka ka caawiso sidii ay ku heli lahaayeen waxyaabaha aasaasiga ah, ee lagu xakameeyo faafidda cudurka (Marada afka lagu xirto, daawada gacmaha lagu dhaqdo iyo wacyigelin xoog badan) iyaga oo lacag la'aan ah iyo in ay siiso xog dhamaystiran oo maalinle ah.

6. In shacabka Soomaaliyeed ay u hoggaansamaan farriimaha caafimaad sida kala-fogaanshaha, af-xirashada, gacmo-dhaqashada, guri-joogista iwm halka Dowladda Federaalka iyo Dowlad-Goboleedyadana looga fadhiyo in ay tixgeliyaan culeysyada dhaqaale ee ka dhalan kara bandowga una oggolaadaan dadka in ay shaqaystaan iyaga oo hubinaya in ay u hoggaansamayaan farriimaha caafimaad. Taas ayaa labada dhinacba ka badbaadin karta iskudhac, muddoharaad iwm. "***Taxadar la'aanta ayaa ka halis badan Covid-19.***"

7. In Dowladda Federaalka, Dowlad-Gobolleedyada iyo qaybaha kala duwan ee bulshada sida ganacsatada, ururada rayidka iwm ay u midoobaan xakamaynta cudurka COVID-19. "***Gacmo wadajir bey wax ku gooyaan***."

8. In Dowladda Federaalka ay shaqaalaha caafimaadka iyo isbitaalada gaarka loo leeyahay gaarsiiso qalabka ay adeegsadaan howlwadeenna daryeelaya bukaannada uu cudurku soo rito, si ayaga laftooda looga ilaaliyo cudurka.

9. In aan la siyaasadeynin gargaarka loogu talaggalay xakamaynta cudurka safmarka Covid-19. Dowladda Federaalka waa in ay Dowlad-Gobolleedyada dalka ku caawiso qalab caafimaad, farsamo iyo khubaro lagaga hortago faafidda cudurka.

10. Dowladda Federaalka iyo Dowlad-Goboleedyadu waa in ay hubiyaan in gargaarka caafimaad aan la musuqmaasuqin si shacabka looga badbaadiyo waxyeellada cudurka.

11. In Dowladda Soomaaliya ay labalaabto baadigoobka ay ugu jirto kaalmo caalami ah sida dhaqaale, gargaar bini'aadannimo iyo mid caafimaadba oo dheeri ah si loo xakameeyo halista safmarka Covid-19.

12. In Dowladda Federaalka iyo Dowlad-Gobolleedyadu ay ka shaqeeyaan sidii is-faham ay ula gaari lahaayeen ururka Al-shabaab si gurmad loogu fidiyo dadka uu saameeyey cudurka Covid-19, kuwaas oo ku nool deegaanada uu maamulo ururku.